



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, Tiếng Việt la soo geliyay: <https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>.

Febraayo 7, 2022

Ku socota: Dhammaan Hawl-wadaagayaasha ODDS & Daryeel  
Bixiyayaasha

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada  
Koriinka

Ujeedada: Xaalada Caafimaad ee Degdega Ah Ee Dadweynaha Ee  
Federaalka Ee La Kordhiyay

Dowladda federaalka ayaa kordhisay xaalada caafimaad ee degdega ah ee dadweynaha, ama PHE, saddex bilood oo dheeraad ah – ilaa bartamaha-Abril 2022. PHE ayaa markii hore la qorsheeyay in ay joogsato bartamaha Janaayo 2022.

Tani waxay ka dhigan tahay in Oregon ay kordhin doonto “oggolaashaha xaalada degdega ah” ee ay leedahay ee loogu talagalay qaar ka mid ah adeegyada soo socda ee ku xiran PHE federaalka:

- Oggolaanshaha waalidiinta/mas’uuliyiinta qaarkood ee carruurta qabta naafanimada maskaxda ama korriinka (I/DD) in ay noqdaan Shaqaalaha Taageerada Shakhsiyeed (PSW-yada) iyo Xirfadlayaasha Taageerada Tooska ah (DSP-yada) oo lacag la siiyo kuwaasi loogu talagalay carruurtooda yar yar. Oggolaashaha xaaladan degdega ah ayaa la siiyay Oregon iyada oo sababtu tahay PHE iyo cudurka baahsan ee COVID-19. ODDS ayaa qabatay [kulanka dhanka internet-ka ah Diisambar 12](#) oo ka jawaabtay su’aalaha ku saabsan qaabka maalgelinta ee Oregon iyo sababta xeerarkeenu aysan noogu oggolaanaynin in aan tani ka dhigno kala doorasho joogto ah. La presentación del seminario web también estará [en español](#).

- Oggolaanshaha loogu talagalay kulamada Qorshayaasha Taageerada Shakhsi (ISP) ee meesha fog la joogo iyo telehealth.
- Oggolaanshaha isticmaalka elektarooniga ah ama saxiixyada dhanka afka si loo ilaaliyo caafimaadka iyo badbaadada inta lagu jiro cudurka baahsan ee COVID-19.

ODDS ayaa bixin doonta ogeysiinta ugu badan ee suuragalka ah marka aanu hayno ogeysiin rasmiga ah ee PHE joogsanaysa.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty  
Agaasimaha  
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa*  
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.